


Hay'adda Istaatistikada Qaranka (HIQ)



TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA

Janaayo 2021

Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bisha Janaayo 2021 ayaa ahaa 118.83, marka la barbardhigo 120.18 bishii Diseembar 2020.

Isbedel bileedka, Janaayo 2021, marka la barbar dhigo Diseembar 2020, ayaa hoos u dhacay -1.15 boqolkiiba. Tan ayaa imaanaysa, marka labarbardhigo hoos u dhac bille ah oo gaaraya -0.83 boqolkiiba bishii Diseembar 2020. Majiro sare u kac bille ah oo muuqdey inta lagu guda jirey bishii Diseembar 2020.

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay (Janaayo 2020 iyo Janaayo 2021) (heerka sicir bararka) ayaa muujinaya in dhammaan qeybaha TSB uu sare u kacay 5.00 boqolkiiba, Marka la barbardhigo 4.84 boqolkiiba ee 12kii bilood (Diseembar 2020 iyo Diseembar 2021).

Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Janaayo 2021 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Janaayo 2021	
Tusaha bishan Janaayo 2021	118.80
Tusaha bishii hore Diseembar 2020	120.18
Tusaha sanadkii hore Janaayo 2020	113.14
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	-1.15%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	5.00%

Heerka sicir bararka marka loo eego

Tixraac TSB

Isbedelka boqoleyda ee 12bilood

Index = 100 @ December 2014



Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Nofeembar 2020** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Janaayo 2021

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Janaayo 2021

Heerka sicir-bararka bisha Janaayo 2021 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Janaayo 2020 iyo Janaayo 2021.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay 5.00 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Janaayo 2020 iyo Janaayo 2021, marka la barbardhigo 12kii bilood ee Diseembar 2020 iyo Diseembar 2021 uu ahaa 4.84 boqolkiiba.

Dhammaan qeybaha TSB isbedelka billaha ah ayaa hoos u dhacay -1.15 boqolkiiba bisha Janaayo 2021, marka labarbardhigo hoos u dhac gaaraya -0.83 boqolkiiba bishii Diseembar 2020.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Janaayo 2021.


Sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay dhammaan qeybaha TSB.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi hoos u dhacay -2.74 boqolkiiba, inta lagu jiray bisha Janaayo marka la barbardhigo hoos u dhac gaaraya 1.08 boqolkiiba bishii Diseembar 2020. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada quutul daruuriga ah oo qiimahoodu hoos u dhaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa gaaray 1.18 boqolkiiba Janaayo 2021. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ahaa 1.24 boqolkiiba Diseembar 2020.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaa laga dareemay sare u kacay bille ah 0.49 boqolkiiba intii lagu guda jiray Janaayo 2021, marka la barbardhigo hoos u dhac bille ah oo gaaraya -3.36 boqolkiiba bishii Diseembar 2020. Sicir bararka sanadlaha ah ee bisha Janaayo 2021 ayaa Sare u kacay 9.16 boqolkiiba, marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah ee bishii Diseembar 2020 oo ahaa 8.77 boqolkiiba.

Dhammaan qeybaha TSB & qeybaha la xushay

Index = 100 @ December 2014




Isha Xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Janaayo 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Tixra TSB, Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Janaayo 2021 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Caafimaadka** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah oo gaaraya 19.10 boqolkiiba bishii Janaayo 2021. Sare u kaca waxa sababay qiima koror ku yimid adeega Cusbitaalada oo gaaray (+94.41 boqolkiiba). Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid adeega daweynta bukaanada oo noqday(+150.00 boqolkiiba).
- **Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaas** ayaa muujiyey sare u kac Sanadle ah oo gaaraya 9.16 boqolkiiba bisha Janaayo 2021, sare u kaca ugu weyn ayaa ahaa qiimaha biyaha iyo Agabyada kala duwan ee la xiriira hoyga (36.36 boqolkiiba). qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid gaaridameerka fuustada biyaha qaada oo gaaray(+42.86 boqolkiiba).
- **Dharka iyo Kabaha** ayaa sicirkooda sanadlaha ahi sare u kacay 18.93 boqolkiiba. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha dharka (+18.89 boqolkiiba) iyo kabaha (19.09 boqolkiiba) taasoo ka dhalatay sare u kac ku yimid dharka dumarka oo gaaray (+23.85 boqolkiiba), caruurta (23.15 boqolkiiba) iyo kabaha oo ahaa (+19.09).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 14.40 boqolkiiba Janaayo 2021. Sare u kaca waxaa sababay saameynta shakhsi ahaaneed oo qiimahoodu gaaray (+14.68 boqolkiiba). Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dahabka iyo Saacadaha (+17.13 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoysaska iyo Dayactirka** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah 8.52 boqolkiiba ee Janaayo 2021, marka la barbardhigo 7.72 boqolkiiba oo la diiwaan geliyey bishii Diseembar 2020. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid agabka guryaha iyo adeega farsamada agabka guryaha (+14.71 boqolkiiba).


Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Janaayo 2021 (-)

- **Tubaakada** ayaa sameysay hoos u dhac sanadle ah oo gaaraya -8.19 boqolkiiba Bishii Janaayo 2021. Sida la wariyey hoos u dhaca ugu weyn ayaa ahaa in qiimaha Qaadka uu ahaa mid aan fadhin bishii Janaayo 2021, dhaqdhaqaaqa qiimaha tubaakada ayaa ah mid aan salfadhiya lahayn.

B. Qeybaha ugu waa weyn ee saameeya TSB -da

War bixin bileedka bisha **Janaayo 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Janaayo 2021 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Janaayo 2021 (+)

Guud ahaan, majirin qeybaha TSB sare u kac la taaban karo oo bille ah Janaayo 2021.

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Janaayo 2021 (-)

- **Maqaayadaha iyo hoteelada** ayaa hoos u dhacay -3.59 boqolkiiba bishii Janaayo 2021, halka 0.00 boqolkiiba la diwaan galiyey bishii Diseembar 2020. Hoos u dhaca ugu weyn ayaa ahaa maqaayadaha, Kafeyga iyo wixii la mid ah (-5.78 boqolkiiba).
- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda bilaha ahi hoos u dhacay -2.74 boqolkiiba, intii lagu jiray bishii Janaayo 2021, halka uu ka ahaa 1.08 boqolkiiba bishii Diseembar 2020. qiima dhaca ugu badan ayaa ka yimid cuntada oo gaartay (-2.83 boqolkiiba).

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Janaayo 2021 ee habka (COICOP)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Janaayo 2021 TSB	Diseembar 2020 TSB	Janaayo 2021 TSB	% Boqolkiib a Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiib Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
Dhamaan qeybaha TSB	100.00	113.14	120.18	118.80	-1.15	5.00
Cuntada & Cabitaanada caadiga ah	46.04	118.06	122.83	119.46	-2.74	1.18
Tubaakadda	1.25	136.81	125.61	125.61	0.00	-8.19
Dharka & Kabaha	5.03	121.89	143.69	144.97	0.89	18.93
Guryaha, Biyaha, Korontada & Gaaska	23.41	103.40	112.32	112.87	0.49	9.16
Agabka Guryaha	2.93	102.72	110.67	111.47	0.72	8.52
Caafimaadka	5.00	119.28	141.26	142.06	0.56	19.10
Gaadiidka	3.77	110.57	105.03	105.07	0.04	-4.97
Isgaarsiinta	2.80	96.32	101.10	101.31	0.21	5.17
Hawo bedeshada & dhaqanka	1.00	98.54	98.05	98.13	0.09	-0.42
Tacliinta	4.00	107.75	109.80	109.80	0.00	1.91
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	135.92	138.76	133.78	-3.59	-1.58
Alaabaha yaryar & Adeegyada	2.77	103.99	118.87	118.96	0.08	14.40

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.

Soosaarida tan xigta


Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Febraayo 2021 waxaa la baahin doonaa 15 Maarso 2021. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

War bixin bileedka bisha **Janaayo 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Lifaaqa 1aad: Dhamaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Janaayo 2021 marka loo eego COICOPka

Dhamaan qeybaha TSB

Qeybaha ka qeyb qaata (%) Heerka sicir bararka (COICOP)



Isha Xogta: NBS

Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bisha oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadsooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

War bixin bileedka bisha Janaayo 2021 (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia